



Wacyi Gelinta Dacwadaha Qoyska

Xogtii U Dambaysay Ee Dacwadaha Qoyska Ee Ku Saabsan Coronavirus (Covid-19)

Ilaa amar dambe, fasalada wacyi gelinta ee fool ka foolka ah ee Wacyi Gelinta Dacwadaha Qoyska waxaa loo bedelayaa ka qeybgal marti gelin la isu diro

Fadlan isu diiwaan geli sida aad isu diiwaan gelin laheyd Wacyi Gelinta Dacwadaha Qoyska. Haddii aad dooneyso in lacagta lagaa daayo, iimeyl u soo dir FamLawOrientation@kingcounty.gov ka hor inta aadan is diiwaan gelin.

Waxaa lagu weydiinayaa halka lagaala soo xiriiri karo marka aad is diiwaan gelineyso. Fadlan hubi in macluumaadkaagu sax yahay, si boostada ama iimeyl laguugu soo diro qoraalada la xiriira wacyi gelinta.

Marka aad akhriso qoraalada, waxaa lagaa doonayaa in aad soo dirto iimeyl aad ku cadeyneyso in aad akhrisay qoraalada Wacyi Gelinta Dacwadaha Qoyska. Fadlan u fiirso haddii aadan soo dirin iimeylka aad ku cadeyneyso in aad akhrisay qoraalada lagu soo diray, laguuma soo dirayo shahaadada in aad dhameysatay tababarka.

Marka iimeylka cadeynta ah na soo gaaro, waxaa lagu soo dirayaa shahaadada in aad qaadatay tababarka. Nuqul (koobi) ayaa lagu soo dirayaa si aad meel u dhigato. Shahaadada asalka ah waxaa loo dirayaa Maxkamadda Sare ee Degmada King.

Haddii aad qabto wax su'aal ama dareen ah, fadlan iimeyl ugu soo dir FamLawOrientation@kingcounty.gov

Sidee la isu diiwaan geliyaa:

Barta internetka:

Fadlan soo booqo <https://kcscfamlaworientation.eventbrite.com>. Waxaa lagu soo dirayaa cadeyn ah in lagu diiwaangeliyey markiiba.

Boostada:

Waxa aad iimeyl u soo diri kartaa FamLawOrientation@kingcounty.gov si laguugu soo diro foomka. Fadlan u fiirso haddii aad isku diiwaangeliso boostada ama fool ka fool waxa aad sugeysaa laba todobaad si laguugu soo diro cadeynta is diiwaangelinta.

Kharashka Wacyi Gelinta Dacwadaha:

Tababarka FLO waa \$20 qofkiiba iyo lacagta is diiwaangelinta. Macluumaadka ku saabsan sida lacag yar loo bixiyo ama lacagta lagaaga daayo, fadlan akhri [Tilmaamaha Yareynta Kharashka](#). Haddii aad ka soo baxdo shuruudaha, fadlan la soo xiriir FamLawOrientation@kingcounty.gov si aad u hesho erayga sirta ee is diiwaan gelinta. Haddii aad dooneyso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan macluumaadka kharashka, fadlan la xiriir (206) 477-1464.

**Su'aalo dheeraad, la xiriir xiriirayaha tababarka
ee: FamLawOrientation@kingcounty.gov**